

## Decabromodiphenyl ether (decaBDE)

### Waa maxay decaBDE?

Decabromodiphenyl ether (decaBDE) waa maado debka/ololka demisa oo loo isticmaalo in lagu yareeyo faafitaanka dabka. DecaBDE waxaa loo isticmaali/dari karaa caagagga, dharka, iyo koolada/xabagta si loo yareeyo fursadda alaabtan dabka ku qabsan karo. Kiimikadan waxaa sidoo kale laga heli karaa qalabka elegtaroonigga ah iyo alaabta guryaha la dhigto. Ilaa iyo 2013 shirkadaha ganaciga Mareykanka iyo kuwa bixiya maadada decaBDE waxay joojiyeen isticmaalka maadadaas.

Xeerka Minnesota (Minnesota statute) 325F.071 sidoo kale wuxuu xadidayaa soo saarista, iibinta, iyo qaybinta walxaha ay ku jiraan maadada decaBDE qadar ka badan 1,000 qaybood halkii milyanba ah qalab kasta oo ka mid ah shey la iibinayo. Badeecadaha/alaabaha duqa ah ee weli la isticmaalo, si kastaba ha noqotee, waxay noqon karaan waddo suurtagal ah oo dadka soo gaarsiin karta kiimikadan waxayna khatar ku noqon kartaa caafimaadka ilmaha dhallaanka ah, carruurta, iyo dumarka uurka leh. BPA waxaa laga heli karaa alaabaha guryaha lagu isticmaalo iyo alaaboo kaleba sida:

- Alaabta Carruurta (kuraasta baabuurta ee duqa ah iyo alaabta lagu ciyaaro).
- Qalabka guryaha (sida kuraasta) ee marada lagu duubay.
- Dharka Guryaha.
- Joodariyada oo ay ku jiraan maadada debka demisa.

### Yaa ugu badan ee halista ugu jira soo gaarista maadadaas iyo khataro caafimaad??

- Ilamaha dhallaanka ah iyo carruurta yaryar ayaa halista ugu badan ugu jira dhibaatada maadada maxaa yeelay waxay u dhow yihiin dhulka waxayna u badan yihiin in ay neef ahaan u qaataan maadada oo xitaa iyada oo aan la fileyn ay cunaan boor maadadu la socoto. Yaraanta jirka carruurta yaryar iyo koboco ku socda xubnahooda ayaa sidoo kale halis u gelin karta inay soo gaarto cawaaqib xumo caafimaad.
- Dumarka uurka leh iyo ilmaha uur ku jirta ah ayaa halis ku jira sababta oo ah waxay aad ugu nugul yihiin soo gaarista kiimikada sababo la xiriira walaaca koboca ilmaha.

### Sidee bey dumarka uurka leh u soo gaari kartaa maadada decaBDE?

- Iisticmaalka alaabaha guriga ee duqa ah (la sameeyay 2013 ama ka hor) (oo ay ku jiraan alaabta guryaha, qalabka elegtarooniga ah, matoorrada, iyo roogagyada) ee lagu sameeyay decaBDE.

- Neefsashada boorka guriga ee ku wasakhaysan decaBDE. decaBDE waxay ku daadin/diiqi (baxsan) kartaa alaabada guriga waxayna ku degi kartaa boorka guriga.

## **Sidee bey ilmaha dhallaanka ah iyo carruurta yaryar u soo gaari kartaa saameynta decaBDE?**

- Neefsashada boorka guriga ee ku wasakhaysan decaBDE. decaBDE waxay ku daadin/diiqi (baxsan) kartaa alaabada guriga waxayna ku degi kartaa boorka guriga.
- Qaadashada caanaha naas nuujinta oo wasakhaysan. decaBDE ayaa laga helay caanaha naasaha/naasaha waxaana loo sii gudbin karaa ilmaha dhallaanka ah iyo carruurta yaryar inta lagu jiro quidinta naas nuujinta. Si kastaba ha noqotee, quidinta naas nuujinta waxay leedahay nafaqooyin looga baahan yahay koboca ilmaha sidoo kale MDH waxay weli sii wadaa in ay ku taliso quidinta naas nuujinta inay tahay habka ugu caafimaadka badan ee quidinta carruurta. Faa'iidooyinka caafimaad ee faraha badan ee quidinta naas nuujinta/laabta waxay u muuqdaan in ay ka weyn tahay waxyeelada suurtagalca ah ee ka soo gaari karta kiimikooyinka deegaanka ee caanaha naas nuujinta (Eeg [Naas Nuujinta, Saameynta Deegaanka/Sunta, CDC](https://www.cdc.gov/breastfeeding-special-circumstances/hcp/exposures/?CDC_AArefVal) ([https://www.cdc.gov/breastfeeding-special-circumstances/hcp/exposures/?CDC\\_AArefVal](https://www.cdc.gov/breastfeeding-special-circumstances/hcp/exposures/?CDC_AArefVal))). Haddii aad ka walaacsan tahay arintan la hadal dhakhtarkaaga/daryeel caafimaad bixiyeahaaga.
- Qaadashada (cunista) boorka guriga oo ay gaartay decaBDE sababo la xiriira kororka gacanta iyo afka istaabsiintooda oo korortay darteed.

## **Maxaa la samayn karaa si loo yareeyo soo gaarista decaBDE?**

- Nadiifi hawo mareenada gurigaaga oo xaaq/fiig fadhiga guriga iyo meelaha aad ku nooshahay marar badan.
- Marar badan ku masax maro qoyan dusha sare meelaha boorka leh ee guriga.
- Haddii ay suurtagal tahay, iska saar oo tuur alaabta guriga ee duqa ah (la sameeyay 2013 ama ka hor), sida alaabta guriga, qalabka elektarooniga ah, matoorrada, iyo roogagga ay ku jiri karaan maadada decabDE.
- Ka fikir iibsashada alaabaha aan lahayn maadada olol yareynta.
- Gacmaha dhaq ka hor diyaarinta iyo cunista cuntada iyo wakhtiga ciyarta carruurta kadib.

## **Maxay yihiin walaaca caafimaad ee laga qabo decaBDE?**

Daraasado ku saabsan xayawaanka shaybaarka ayaa muujiiyay saameynta caafimaad ee xun ee ka timaada soo gaarista kiimikadan. Saameyntan caafimaad waxay walaac u keeneysaan caafimaadka aadanaha waana muhiim in la tixgeliyo, gaar ahaan marka loo eego carruurta. Carruurtu way ka nugul yihiin dadka waaweyn, sidoo kalena soo gaarsteeda waxaa laga yaabaa in ay ka sareyso maadaama ay badan tahay inta jeer ay ilmuu gacantooda afka geliyaan. Qaar ka mid ah saameynta caafimaad ee xun ee lagu arkay xayawaanka shaybaarka waxaa ka mid ah:

- Dhibaatooyin la xiriira koboca maskaxda.
- Kobaca ilmaha uur ku jirta ah iyo caruruurta dhallaanka ah.

## DECABRODIPHENYL ETHER (DECABDE)

- Walaaca caafimaadka beerka.
- Dhibaatooyinka qanjirka taayroodka (thyroid).
- Sun taranka la xiriirta (tirinta isbeermka manida oo hooseeya iyo dumarka oo dhicis/dhiciya uurka).

### Ilo Dheeraad ah

[EPA | Reducing Your Child's Exposure to Flame Retardant Chemicals \(PDF\)](#)

[\(https://www.epa.gov/sites/default/files/2016-05/documents/flame\\_retardant\\_fact\\_sheet\\_3-22-16.pdf\)](https://www.epa.gov/sites/default/files/2016-05/documents/flame_retardant_fact_sheet_3-22-16.pdf)

[EPA | Reducing Decabromodiphenyl Oxide Waste Management \(PDF\)](#)

[\(https://www.epa.gov/sites/default/files/2016-04/documents/p2\\_spotlight\\_decabde\\_final.pdf\)](https://www.epa.gov/sites/default/files/2016-04/documents/p2_spotlight_decabde_final.pdf)

[Connecticut Department of Public Health | Flame Retardants in Children's Products \(PDF\)](#)

[\(https://portal.ct.gov/-/media/dcp/migrated-docs/flameretardantfactsheetpdf.pdf\)](https://portal.ct.gov/-/media/dcp/migrated-docs/flameretardantfactsheetpdf.pdf)

[Department of Ecology State of Washington | Flame Retardants in General Consumer and](#)

[Children's Products \(PDF\) \(https://apps.ecology.wa.gov/publications/documents/1404021.pdf\)](https://apps.ecology.wa.gov/publications/documents/1404021.pdf)

[NIH | Flame Retardants and Your Health \(PDF\)](#)

[\(https://www.niehs.nih.gov/health/materials/flame\\_retardants\\_508.pdf\)](https://www.niehs.nih.gov/health/materials/flame_retardants_508.pdf)

[CDC | Polybrominated Diphenyl Ethers \(PBDEs\) Public Health Statement \(PDF\)](#)

[\(https://www.atsdr.cdc.gov/ToxProfiles/tp207-c1-b.pdf\)](https://www.atsdr.cdc.gov/ToxProfiles/tp207-c1-b.pdf)

[Office of the Revisor of Statutes | 325F.071 FLAME-RETARDANT CHEMICALS; PROHIBITION](#)

[\(https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/325F.071\)](https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/325F.071)

[MDH | Decabromodiphenyl Ether Screening Profile \(PDF\)](#)

[\(https://www.health.state.mn.us/communities/environment/risk/docs/guidance/dwec/screening/decabde.pdf\)](https://www.health.state.mn.us/communities/environment/risk/docs/guidance/dwec/screening/decabde.pdf)

Minnesota Department Of Health (Waaxda Caafimaadka Minnesota)

[Barnaamijka Sunta ka Maran ee Caruurta \(Toxic Free Kids Program\)](#)

651-201-4899 [health.risk@state.mn.us](mailto:health.risk@state.mn.us) [www.health.state.mn.us](http://www.health.state.mn.us)

05/24/2024

*Si aad xogtaan ugu hesho qaabab kale, wac: 651-201-4899.*